Jadwalka Sanad Dugsiyeedka la Jadiidiyay
Waa jadiidinay Jadwalka Degmada ee 2020-21.

Jadwalka waa la badalayaa iyadoo lagu saleynayo gorgortanka heshiiska iyo helitaanka kheyraadka. Haddii cililada xumaato ama xiritaan kale oo deg-deg ah oo ka hor istaagayo Degmada inay soo buuxiso saacadaha waxbarid ee ay u dejiysay ODE, maalmahaa waxaa lagu dari doonnaa Juun.

Toolkit-ka Qoyska
Waxaan ka shaqeyneynaa inaan dhisno maktabad fiidiyowyo oo la dalban karo iyo agabyo kale ee caawinayo qoysaska inta lagu guda jiro xiliga Comprehensive Distance Learning (CDL). Waxaan ku dari doonnaa maktabaddan fiidiyow bilaha soo socda. Fiiri bal maanta! https://www.beaverton.k12.or.us/connect/family-toolkit

Clothes Closet waa furan yahay
Clothes Closet-ka ee ay Degmadu maamusho waxay u furan tahay qaybinta dhar cusub iyo kuwo waxyar la isticmaalay ee arday kastoo BSD ah oo u baahan. Xaalada COVID-19 awgeed, waxaan ka dhignay nidaam ah balan ku imaansho.

Hadaad jeceshahay inaad u sameysato balan ardaygaagu uu wax ku gato, fadlan booqo online. Hadaadan awoodin inaad gasho jadwalkeena khadka, wac **503-356-4322** si aad ballan u qabsato. Fadlan la soco: dhammaan dadka imaanaya Clothes Closet waa iney xirtaan maaskaro. Haddii aadan adigu haysan, waan ku siin doonnaa.

Macluumaadka ku-xirnaanta Internet-ka
Bishaaro Bishaaro! BSD iyo Comcast waxay sii kordhiyeen iskaashigooda si ay u siiyaan adeeg internet oo bilaash ah qoysas dheerad ah ee BSD illaa Juun 30, 2021! Waxaan sidoo kale u fidinayna adeegga internetka bilaashka ah qoysaskaas oo hadda iska diiwaangeliyay barnaamijka BSD- Kafaalad-qaadka Internetka Aasaasiga ah ee illaa Juun 30, 2021. Barnaamijku waxaa heli karo ardayda u qalma kaalmada cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban. Codsiyada waxaa laga heli karaa online.
https://www.beaverton.k12.or.us/free-internet

Haddii ardaygaaga dugsiga hoose ama dugsiga dhexe uusan u qalmin barnaamijka Internetka Asaasiga, buuxi foomkan form si aad u codsato qadka (hotspot).
https://www.beaverton.k12.or.us/departments/information-technology/internet-access-for-families/hotspot-requests

Haddii ardaygaaga dugsigaga sare uusan u qalmin barnaamijka Internetka Aasaasiga, waad ka codsan kartaa apply online ee hotspot bilaash ah iyada oo loo marayo iskaashigeenna mashruuca Sprint ee 1Million.
https://www.beaverton.k12.or.us/hotspots

Hadii aad geliweyso mareegyadan, wac **503-356-4300** si aad u codsato.

Ma caawin kartaa kaalmeynta ardayda u baahan ku-xirnaanta internetka? Hadey haa tahay, fadlan ku tabaructo BEF's Back-to-School Connect Campaign.
https://www.beavertonedfoundation.org/help-connect-every-student-this-school-year-hotspots-for-all/

Aaladaha Deyrta loogu talagalay (Devices for the Fall)
Aalado cusub ee lagu iibiyay Deyntii 2014 ayaa hadda yimid, shaqaalaheena Macluumaadka Teknolojiyada ayaa u diyaarinayo iney qaybiyaan. Ardayda, oo ay ku jiraan kuwa soo galaya fasalka 6aad, waxey hada sii adeegsiga karaan aaladihii la siiyay guga. Waa kan waxii aad u baahan tahay inaad ogaato:

- **Ardayda fasalada K-2** waxey heli doonnaan iPads. Bedelida aaladda wuxuu dhacayaa inta u dhaxeysa Sebtember 1-10. Dugsi kastaa wuxuu la wadaagay jaaliyadiisa taariiqda iyo waqtiyada bedelaada.

- **Fasalada 3-5 iyo ardayda dugsiga dhexe** ee barashada khadka (aan aheyn kuwa iskuulada khiyaariga) Waxey heli doona Chromebooks-yo cusub. Waxaan fileynaa bilowga howsha bedelida dhamaadka bisha Sebtember. Ardayda dugsiyada ikhtiyaariga ah waxay heleen aallada cusub sanadkii hore.

Hadii aaladda ardaygaagu aaney shaqeyneynin, cunugaadana uusan qaadan aallad gugii oo uu hada ubaahan mid, ama ardaygaagu ku cusub yahay degmada, fadlan u dir e-mailka Xafiiska Caawinta Ardeyda **shd@beaverton.k12.or.us** si laguu caawiyo.

Isbedelka gelida Chromebook-ga Ardayga
Laga bilaabo Sebtember 8, galitaanka ardayga ee Chromebook-ga ayaa isbeddeleysa. Isbeddelkani wuxuu keenayaa horumar amaanka ah oo muhiim ah. Ardayda waxay ku gali doonaan Chromebook-yada e-maylka ardayga oo dhameystirin (i.e. 123455@bsd48.org).

Rakibka, tilmaamaha gelitaanka iyo jawaabaha su'aalaha guud ee caawinta waxaa laga heli karaa Frequently Asked Questions webpage.

Barnamijka Ceymiska Aallada

Kutalagalku waa in dhamaan ardaydu helaan aallad leedahay(Chromebook ama iPad) degmadu waxay $ 20 oo khidmo ah kudartaa koontada ardayda Online Payment (ugu badnaan $ 60 qoyskiiba sanad dugsiyeedka) si loogu diiwaan geliyo Barnaamijka Ka-hortaga Khasaaraha.Lacagtaan waxaa laga dhaafay qoysaska u qalma barnaamijka kaalmada cuntada bilaashka ah ama la qiimo dhimay ee soo buuxiyay Permission to Share Form. Ardayda waa inay bixiyaan khidmadda lagu qoray ka hor wax haleynta ama sheegashada luminta inay xaq u leeyihiin Barnaamijka caymiska Ilaalinta oo aan ka dambayn 30 maalmood ka dib marka iskuulku bilaabmo.

Ardayda waxey dooran karaan inay diidaan ceymiska, laakiin tan laguma talinayo inaadan aalad, maxaa yeelay qoysku wuxuu qaadanayaa mas'uuliyad buuxda wixii kharash ah oo ka yimaadda waxyeelo, lumis ama xatooyo. Kharashaadkaasi waxay noqon karaan ugu badnaan $ 300 dhacdo kasta, iyadoon loo eegayn sida ay wax u dhacayaan.

Booqo Student Device Resources webpage wixii macluumaad dheeri.

BASE oo Mideysay Labo Iskuul oo Mid Noqday

Shaqaalaha Beaverton Academy of Science and Engineering - oo loo yaqaan BASE - waxay ku faraxsan yihiin inay si rasmi ah ugu dabaaldegaan (si khad ah) dugsiga cusub ee ay la midoobeen. BASE waxay isku dari doontaa awooda labada iskuul ee Caafimaadka iyo Sayniska iyo Iskuullada Sayniska iyo Teknolojiyada.

Sida bayaanka howlgalka uu sharxayo, "Akadeemiyadda Beaverton ee Sayniska iyo Injineernimada waxay soo dhaweyneysaa diyaarineysaa bulsho ardayda oo kala duwan oo barwaaqooba, hogaamiyo oo ay gacan ka geystaan adduun wanaagsan iyaga oo isticmaalayo dadaalo, khibrado waxbarasho, hal abuur leh iyo iskaashi leh.

"In kasta oo laga yaabo inaan ku noolnahay cajiib ah oo aan la hubin, bulshada BASE waxay sii wadi doontaa inay siiso ardayda ku jirta sayniska iyo waddooyinka barashada cilmiga biomediga, cilmiga kumbuyuutarka iyo injineeriyadda fursado waxbarasho adag oo hal abuur leh," ayuu yiri maamule Andrew Cronk. "Sidii Phoenix oo kale, waan usoo kacnaa – isku-dejinta laba dhaqan una beddelayno hal jawi waxbarasho oo la heli karo oo midaysan."

Iskuulka ayaa ardayda ku soo dhaweyn doonno – si khadka ah - Sebtember 14.

"Waxaan si gaar ah ugu faraxsanahay in ardayda oo dhami isu yimaadaan," ayay tiri guddoomiyaha guddiga ardayda, Natalie Dueltgen. “BASE inta badan waa mid diirada

lagu saaro bulshada- iyo iskaashigu. Kulligeen waxaan fursad u heli doonnaa inaan barano oo aan wax ka baranno dadka leh damacyo kaladuwan iyo dariiqyo kala duwan, taasina waa wax aan si weyn u rajeynayo. In kasta oo sannadkan laga yaabo inuu adkaan karo oo ka duwan yahay sidii aan filaynay, waxaan hubaa inaan heli doonno dariiqooyin aan ku sii dhexgalno, ku isku-xirnaano oo aan u mideysnaano sida dugsi bulsho. ”